

Boqol magaclay (hees)

Saturday, 06 February 2010

Waxa Curiyey : C/raxmaan Maxmed Cali ubaxle

Heestani

wxay igu dhalatay dabayaqadii sanadka 2009 mar ay noo dhalatay
inan aanu walaalo nahay oo aanu kala bah nahay bahdakale ee aanu walaalaha
imika waa lix inanmo ah sidaa awged markii inantani dhalatay ayaa qof
waliba magac ubixiyay aniga oo magacyadaa badan kulminaya ayaan heestan
boqol magaclay tiriyay waxaan ku dheehan waano iyo ladardaaran walaal
nimo dhanka kale waxaan soo qaadanayaa bahda
suugaanta iyo naadiyada akhriska waxaan kaloo ku amaanayaa magaalooyinkeena

Maansadu intan kuma wada dhama ee waxan
kasoo qaatay qayb kamida

Barwaaqiyo fatxaay

Bureeqiyo khadraay

Badra saafiyeeey

Walaal baariyeeey

Boqol magaclayeeey

Bilan dhalatayeeey

Barni quruksaneey

Basra fiicaneey

Buuxa qaaliyeey

Baxsaneey walaal

Bilicdeenibaad

Kubanaantohoo

Bulshadaba adaan

kaalaso boxoo

anaa beert macaan

kuubislaynayoo

baarcad kuu qalee

kubushaaranoo

kuu barataneey

soo barbaar walaal

meelnaga banaan

noo buuxiyoo

barbarkay istaag

barihore waxdhacay

taariikh kabogo

barashada cilmiga

buundooyin sare

aad kusoo baxdide

akhri buugtanoo

qalinkana bilaw

naadiga burciyo

akhristaha kubiir

waxaad beerataa bari

kuu go ee

balanteenu waa

adoo beebiyaan

bacad kaa qabtee

diinta baal istaag

oo beenta diid

dhaqankeena beer

balaydaa si waa

inantii bilkhayr

googaa bahdaay

afka baylehee

bahaladu liqeen

kabadbaadiyoo

badhitaar walaal

murti baaxdloo

biyo siisidaan

kabadbaadiyoo

badhitaar walaal

maansadu badoo

badhaxbaa dilee

kabadbaadiyoo

badhitaae walaal

buunbuuniyoo

miisaan ku beeg

maldeheeda beeg

baystayn hasiin

cudurada batee

bulshadii kudhacay

jahli baahiyoo

bulbul saarayana

kabadbaadiyoo

badhitaar walaal

balaydaa cugee

heestan kale waa hees ku saabsan Burco, oo uu sameeyey Ubaxle waxa uu yidhi ,

Ma Ogtahay burcooy

inbadhaadhihi

kuusoo baryaa

iiyahay bil khayr

iyu bushaaro culus

Ceelal wada buqliyo

bada wabiyo galay

Adigay burcooy

inta baad jirtiyo

Dhirta baaxada le

kaasoo bexeen

Meesha ugubadan

xoolaha bate

Laga guro badaha

bulshadii dhaqdaa

Adigay burcooy

kaasoobarteen

Baqashiyo fardaha

lagu baratamana

Kuwa buubiyaa

adigay burcooy

Kugusoo bateen

Bureeqooyinkiyo

barnidiyo hablaha

Inta baal cadiyo

inta madax banana

Adigay burcooy

kaa barbaarayaan

Beeraha fankiyo

raga wada burqaday

Adigay burcooy

boqorada shinidu

Kaasoo bexeen

Bulsho iyo aftahan

Inta buug qortee

Ina bashaliyo

Adigay burcooy

Boqolaal kaleba

kaasoo bexeen

Baalalayda iyo

inta buul dhistaa

Beedkooda wacan

Adigay burcooy

bog kusocoshadana

Beeri kaahleen

Barafaysarkiyo

bahda culimaduna

Adigay burcooy

bilawgiyo cilmiga

Kaasoo barteen

Bariga africiyo

baalaha dunida

Adigaa burcooy

bilad sharaf mutee

Ma Ogtahay burcooy

inbadhaadhihi

kuusoo baryaa

iiyahay bil khayr

iyo bushaaro culus